



**HESHIISKA WADA SHAQAYNTA LABADA AQAL EE
BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA
(GOLAHA SHACABKA IYO GOLAHA AQALKA SARE)**

Muqdisho,

01 Oct. 2019

**GUDDOOMIYEYAASHA LABADA AQAL EE BAARLAMAANKA
FEDERAALKA SOOMAALIYA (GOLAHADH SHACABKA IYO GOLAHADH
AQALKAA SARE):**

MARKII AY ARKEEN:

Qod.55^{aad} ee Dastuurka KMG ah oo xeerinaya in Baarlamaanka Federaalka uu ka kooban yahay labo gole: Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare.

MARKII AY ARKEEN:

Xilalka Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare ee ku qeexan **Qod.61^{aad}**, **Qod.62^{aad}**, **Qod.63^{aad}**, **Qod.69^{aad}** iyo **Qod.71^{aad}** ee Dastuurka KMG ah.

MARKII AY ARKEEN:

Qod.56^{aad} Dastuurka KMG ah kaas oo faraya in labada aqal ay u gutaan xilalka ay wadaagaan si wadajir ah.

MARKII AY ARKEEN:

Qod.80^{aad} (1)(b) ee Dastuurka Federaalka KMG oo si cad u qeexaya in miisaaniyadda Qaranku ay tahay hindise sharchiyeed.

MARKII AY ARKEEN:

Qod.90^{aad} (f) ee Dastuurka Federaalka KMG oo xeerinaya in Madaxweynaha Jamhuuriyaddu uu saxiiyado hindise-sharchiyeedyada uu soo ansixiyo Baarlamaanka Federaalka (Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare) si sharchi looga dhigo.

MARKII AY ARKEEN:

Madaxa Afaraad ee Cutubka Lixaad ee Dastuurka KMG ah oo xeerinaya habraaca xeer dejinta Baarlamaanka Federaalka (Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare).

MARKII AY TIXGELIYEEN:

Natijada kulan ay **14 Juun 2019** wada yesheen labada guddoomiye iyo kulamadii ka dambeeyay iyaga oo ka wada-hadlay xaaladda siyaasadeed ee Dalku ku sugaran yahay iyo in la gaaro heshiis ay ku wada shaqeeyaan Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare; si loo dhammeystiro howlaha xeer dejinta ee horyaalla labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soom-aaliya.

WAXAY KU HESHIYEEN QODOBBADA SOO SOCDA:

QOD.1^{AAD} SHARCIYADDA WADA SHAQEYNTA

Wada shaqeynta iyo iskaashiga Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare waxaa gundhig u ah Dastuurka KMG ah, Xeer Hoosaadyada Goleyaasha, iyo Xeerarka kale ee Dalka.

QOD.2^{AAD} MABAADII'DA WADA SHAQEYNTA

1. Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare waxay ku wada shaqeyn doonaan mabaadii'da soo socoto:

- Iskaashi xeer dejineed
- Xog isdhaafsi joogto ah
- Hirgelinta heshiisyada u dhaxeeya labada dhinac

- Ka warqabka baahiyaha horumanineed ee labada gole iyo in la iska kaashado sidii loo dabooli lahaa.
- Isku-tixgelinta waajibaad gaar ahaaneed ee ay kala leeyihii labada aqal.

QOD.3^{AAD}

QEYBSIGA XUBNAHA BAARLAMAANNADA QAARADEED, KUWA GOBOLEED IYO KUWA ADDUUNKA

Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare waxay u qeybsanayaan xubnaha ku metelaya Baarlamaannada Qaaradeed, Kuwa Goboleed iyo Kuwa Adduunka si caddaalad ah oo ay ka muuqato metelaadda labada aqal.

QOD.4^{AAD}

ANSIXINTA MIISAANIYADDA QARANKA

Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare waxay ansixinayaan Miisaaniyadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, ku-noqoshadeeda iyo xisaab xirkeeda si waafaqsan habraaca dastuuriga ah ee xeer dejinta Dalka.

QOD.5^{AAD}

DHISIDDA GUDDIGA ADEEGGA BAARLAMAANKA FEDERAALKA

Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare waxay dhisi doonaan guddiga adeegga baarlamaanka ka dib marka ay soo idlaato dib-u-eegista Dastuurka KMG ah.

QOD.6^{AAD}

MATAANAYNTA GUDDIYADA LABADA AQAL

Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare waxay mataanaynayaan guddiyada labada aqal ee u wada xilsaaran waajibaad isla mid ah kuwaas oo iska kaashan doona dhammaan howlaha xeer dejinta.


QOD.7^{AAD}

XEER HOOSAAD WADAJIR AH


Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare waxay yeelanayaan xeer hoosaad wadajir ah kaas oo faahfaahinaya dhammaan arrimaha la xiriira qodobbada lagu heshiiyay, guddiyada wada-jirka ah, habraaca guud ee isu-gudbinta hindise-sharchiyeedyada, iyo xiriirada gudaha iyo dibedda ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

QOD.8^{AAD}
DHAQAN-GALKA HESHIISKA

Heshiiskan wuxuu dhaqan gelaya marka labada Guddoomiye ay wada saxiixaan laguna shaabbadeeyo shaabbadaha labada aqal.



Xildh. Maxamed Mursal Sh. C/Raxmaan
Guddoomiyaha Golaha Shacabka



Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi
Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare

